

# I KNOW I CAN

i know  
i can

## FURSADAHHA MAALIGALINTA



### DEEQDA WAXBARASHO EE FOUNDERS

Waxa heli kara ardada dugsiya sare ka qalin jabin doona (seniors) kuwaas oo afartii sano ee ugu danbeesay ka diiwaan gashanaa iskoolada degmada Columbus (CCS). Ardeyga waxaa laga rabaa inuu diyaariyo: Maqaala, qoraal shakhsi, warqad talo ka bixin ah, iyo sidoo kale waxaa laga qaadi doona waraysi. **Deeqda la bixin doono sanadkii waa \$ 10,000. Deeqdaas ilaa 4 sano ayey ku socon doonta hab cusbooneysiin ah.**

Xiliga codsiyada ay dhamaanayaan: 1da Febraayo.



### DEEQDA WAXBARASHO EE DREAM BIG

Waxa heli kara ardada dhigta Columbus City Schools kuwaas oo buuxinaaya shuruudaha Pell-eligible. Ardaygu waa in uu buuxiya codsiyadaas waqtiga lagu talagaley. **Deeqda la bixin doono sanadkii waa \$ 3,500. Deeqdaas ilaa 4 sano ayey ku socon doonta hab cusbooneysiin ah.**

Xilliga codsiyada ay dhamaanayaan: 1da Maarso.



### DEEQDA WAXBARASHO EE I KNOW I CAN

Waxa heli kara ardada dhigta Columbus City Schools kuwaas oo buuxinaaya shuruudaha Pell-eligible. Ardaygu waa in uu buuxiya codsiyadaas waqtiga lagu talagaley. **Deeqda la bixin doono sanadkii waa \$ 1,200. Deeqdaas ilaa 4 sano ayey ku socon doonta hab cusbooneysiin ah.**

Xilliga codsiyada ay dhamaanayaan: 1da Apriil.



### DEEQDA WAXBARASHO EE COLUMBUS PROMISE

Ardada CCS waa in ay xareeyaan cosidyada waqtiga lagu tala galey. Deeqdaas waxbarasho waa mid dhamaystiran (full tuition) waxaana ardaygu si bilaash ah ku dhigan doonaa Columbus State Community College. **Intaas waxaa dheer in ardaygu ay heli karaan \$ 500 semester walba si ay iskaga bixiyaan qarajka kale ee waxbarasho sida bugaagta iyo wixii lamid ah.**

Deadline: April 15th

Waa in aad buuxisaa FAFSA (Free Application for Federal Student Aid) si aad u heshid fursadahaas kor ku xusan. Xogta fursadaha deeqda waxbarasho iyo sida loo buuxiyo waxa aad ka heli kartaa barta internetka ee hay'adda IKNOWICAN ay leedahay: [www.iknowican.org](http://www.iknowican.org).

# MAXAAD U BAAHANTAHAY



# SI AAD U BUUXISID

# FAFSA

FAFSA oo magaceeda marka la micneeyo u dhigma Free Application for Federal Student Aid, waa codsiga caawinaadda waxbarashada. Codsiga FAFSA waxa maamula isla markaana iska hel Agaasinka Waxbarashada ee Mareekanka (U.S Department of Education). Agaasinka Waxbarashada waxa ay aruuriyaan xogta degaanka iyo xogta dhaqaale ee ardayga iyo waalidkood si ay uga qiyaas qaataan xaalada dhaqaale ee qoyska, waxaana xogtaas loo isticmaala si lagu kala sooco ardada xaqa u leh inay helaan caawinaadda dhaqaale. Hadaba sida ugu wanaagsan ee loo xareeyo codsiga FAFSA, ardayga iyo waalidkood waxa ay u baahanyihiin waraaqahaan hoos ku xusan:

## Ardada

- 2020 Federal Tax Return (1040)
- 2020 W-2 (shaqo walba aad qabatey 2020)
- Lanbarka Social Security
- Lanbarka iqaamadda (dadka aan dhalashada haysan)
- Leesanka gaari wadista
- Xogta shaqooyinka dheeriga ah
- Lacagaha bangiga kugu jira (Bank statement)

## Waalidka

- 2020 Federal Tax Return (1040)
- 2020 W-2 (shaqo walba aad qabatey 2020)
- Lanbarka Social Security
- Xogta lacagaha dheeriga ah aad sameesid
- Dhaqaale aan lagaa caanshuurin (hadii ay jiran)
- Lacagaha bangiga kugu jira (Bank statement)
- Xogta maalgashi aad leedahay

**Ogaysiis:** Waxa aad awood u leedahay in xogtaada canshuureed aad IRS ka soo wareegsan kartid si automatic ah adoo isticmaalaya Data Retrieval Tool (DRT) ee ku dhex jirta FAFSA. Taas oo ay kuu fududeen karto howsha buuxinta xogaha FAFSA. Marka aad rabtid in aad buuxisid FAFSA waxa aad isticmaasha FSA ID si aad u heshid xogtaada ku jirta barta IRS ee ay ku leedahay internetka si aad usoo wareejisid xogta ku saabsan caanshuurtaada.